



Siinta xubnaha OHP caymiska iyo adeegyada ay u baahan yihiin, markii ay u baahan yihiin

Marka dadku ku jiraan xaalad nololeed oo kala-guur oo muhiim ah, sida ka bixidda xabsi, laga saarayo Cisbitaalka Gobolka Oregon, ama ay lumiyaan guryeynta, sida badan waxay lumiyaan helitaanka bixiyayaashooda daryeelka caafimaadka taasi oo keenta natiijooyin caafimaad oo xun. Kala-guuradan waxay xataa ku sii adag yihiin dadka waajahaya xaalad ama dhibaatooyin caafimaadka dabeecada ah.

Dadku waxay lumiyaan daryeelka muddada lagu jiro wakhtiyadan sababtoo ah iyaga kalidood ayaa loo dhaafaa inay mushaaxaan “nidaamka” dhexdiisa. Nidaamka waxa kamid ah taageerooyin kala gaar ah oo badan, sida Qorshaha Caafimaadka Oregon (Medicaid), kaalmada cuntada (SNAP), iyo dheeraad. Maamulka Caafimaadka Oregon wuxuu rabaa inuu daboolo galdaloolada caymiska iyo daryeelka, oo sidoo kale uu ku bixiyo adeegyo iyo taageerooyin is-wata oo qeexan baahiyaha bulshada ee caafimaadka la xiriira. Marka la bixiyo taageerooyinkan, xubnaha Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) waxay waajahi galdaloolooyin yar oo daryeelka ah, taasi oo ka dhigan natiijooyin caafimaad oo hagaagsan.

Xeeladaha suurtoogalka ah ee abuuridda nidaam caddaalad ku salaysan oo caafimaad

Hoos waxa ah xeeladaha qaar oo Maamulka Caafimaadka Oregon uu qorshaynayo inuu oggolaansho ka waydiisto dawladda fadaraalka inuu bilaabo:

1. Ka dhaafidda xeerka fadaraalka ee ka horjoogsanaya qofka xabsi ku jira inuu helo dheefaha Medicaid

Hadda, marka xubnaha OHP ay galaan meelaha dadka lagu hayo ee gobolka (sida xabsi ama Cusbitaalka Gobolka Oregon) waxay waayaan caymiska Medicaid. Marka la sii daayo, waxay qaadan kartaa ilaa laba toddobaad inay mar labaad caymiska helaan, taasi oo sida badan ka dhigan toddobaadyo bilaa daryeel ah (ballamaha dhakhtarka, daawada, iwm). Si ay gacan uga gaysato wax ka qabashada arrintan, Oregon waxay rabtaa inay:

- Siiso caymis dadka da’da yar ee mutaystay, xataa haddii ay ku sugan yihiin nidaamka dhaqancelinta dhallinyarta. Dad badan oo da’ yar, tani waxay uga dhigan tahay ku *sii jiridda* OHP.
- Siiso caymiska OHP ama adeegyada kala-guurka CCO ee habboon xubnaha OHP, xataa markay ku jiraan Cusbitaalka Gobolka Oregon, xarumaha dhimirka ee lagu noolaado, iyo xabsiyada. Marka la eego dadka ku sugan xabsiga iyo cusbitaalka gobolka, caymisku wuxuu u bilaabmi 90 maalmood kahor inta aan la sii daynin.

Noocyada xarumaha

Xabsiga dhallinyarta: Meel dadka da’da yar ee lagu helo dambi lagu xabbiso si loo siiyo adeegyo dhaqangalineed.

Xabsi: Meel dadku muddo ku jiraan marka lagu xumo dambiyo.

Jeel: Meel dadka xukunka maxkamadeed sugaya lagu

- Bixiso faa'idooyinka OHP iyo isdiiwaangalinta CCO oo loogu talagalay xubnaha OHP ee jeelka degmada ku jira ama xabsiyada deegaanka, oo ay ku jiraan dadka sugaya taariikhda maxkamadda la gaynayo.






2. Sii OHP iyo taageerooyinka kala-guurka ah ee Dhallinyarada qaba Baahiyaha Daryeelka

Caafimaadka Gaarka ah (YSHCN) ilaa da'da 26. Xeeladdan waxa ujeedadeedu tahay in loo diyaariyo Dhallinyarta qaba Baahiyaha Daryeelka Caafimaadka ee Gaarka ah guulaysi marka ay noqon rabaan dad waawayn. Dadka dhallinyarta ah ee qaba baahiyaha daryeelka caafimaad ee gaarka ah, kala-guur wax ku ool ah oo ay caafimaadka carruurnimada kaga guurayaan uguna wareegayaan daryeelka caafimaadka dadka waawayn waxay keeni:

Wax badan:	Wax yar:
<ul style="list-style-type: none"> • Daryeel joogto ah • Qanacsanaanta bukaanka • Tayada nolosha • Xirfadaha is-daryeelidda 	<ul style="list-style-type: none"> • Galdaloolooyin daryeelka ah • Caqabado hor taagan daryeelka • Inta jeer ee cusbitaal dhigidda ah • Muddada joogitaanka cusbitaalka

3. Siinta bulsheed waajahaya

nolosha. Dhacdooyinka badan ee nolosha, sida waayidda guryeynta ama saamaynta cimilada xun, waxay ku keeni karaan xubnaha inay waayaan caymiska ama ay la xiriiri kari waayaan bixiyayaashooda daryeelka caafimaad. Si ay gacan uga gaysato haysashada caymiskooda, inay xiriirka la sii wadaan bixiyayaashooda daryeelka caafimaadka, oo ay caafimaad qabaan, Oregon waxay rabtaa inay siiso taageero bulsheed xubnaha marka ay waajahayaan dhacdooyinka noocan ah. Taageerada kala-guurka waxa ka mid ah adeegyada la xiriira:

				
Guryeynta	Gaadiidka	Caawinta cuntada	Taageerada shaqaalaynta	Ka difaacidda dhacdooyinka cimilada

- ## 4. Caymiska bixiyayaal badan oo ka baxsan moodada caafimaad.
- Bixiyayaasha ka baxsan moodada caafimaad waxa ka mid ah shaqaalaha caafimaadka ee soo-jireenka iyo bulshada, mushaaxayaasha caafimaadka shakhsi ahaaneed, faydaqabka lodka iyo taageerada khabiirada, iyo duulada (haweenayda hagta haweenayda fooshu hayso). Bixiyayaashan adeeggu sida badan waxay ku nool yihiin oo ka shaqeeyaan isla bulshada xubnaha OHP ka tirsan yihiin, taasi oo ka dhigan inay si qoto dheer u fahmi karaan waxa xubnaha OHP ay waajahayaan. Marka la hubiyo in gobolku siiyo lacag ku filan adeegyada ay bixiyaan, xubnaha OHP waxay heli doonaan daryeel dhaqan ahaan habboon.

5. **Maalgalinta Ururada Bulshada Ku Salaysan (CBOs).** Ururada bulshada ku salaysan sida badan waxay sida ugu fiican u fahmaan baahiyaha xubnaha bulshada ee ay u adeegaan. Haddaba waxay awoodaan inay ku siiyaan adeegyo dhaqan ahaan habboon dadku luuqadda ay doonayaan kuna xiraan khayraadka. Oregon waxay qorshaysay inay lacag ku maalgaliso ururada bulshada ku salaysan, si ay u caawin karaan xubno badan oo OHP ah.

Waxa ay tani uga dhigan tahay xubnaha OHP

Sida ka dhaafidda cusub sheegayso, xubnaha OHP waxay sii haysan caymiska, daryeelka, iyo adeegyada, xaalado badan. Xaaladahan qaarkood waxa ka mid ah:

- Ka bixidda Cusbitaalka Gobolka Oregon, xarumaha la deggan yahay ee dhimirka, ama xabsiga.
- Dhallinyarta qabta Baahiyo Daryeelka Caafimaadka oo Gaar ah waxay sii wadan caymiskooda ilaa da'da 26 halkii ay ku waayi jireen da'da 18.
- Dadka halista ugu jira dhacdooyinka cimilada ee aadka u xun
- Dhallinyarta ku sugan daryeelka korinta
- Dadka waayeelka ah ee haysta caymiska caafimaadka ee Medicaid iyo Medicare

Waxaad ku heli kartaa dukumintigaan luuqado kale, daabacaad weyn, qoraalka indhoolayaasha ama qaabka aad jeceshahay. Kala xiriir Community Partner Outreach Program community.outreach@dhsosha.state.or.us ama adigoo wacaya 1-833-647-3678. Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka hadalka dhibayo ama waxaad wici kartaa 711.